# Oggolaanshaha Waalidka ee Helitaanka Caymiska Dadwaynaha (Medicaid) iyo Fasixidda Macluumaadka Qofka lagu Aqoonsan karo iyadoo Ujeedadu tahay Qaansheegadka Medicaid

Waalidka/Masuulka Sharafta leh:

Ujeedadu waraaqdani waa in lagaa codsado ruqsad, sidoo kale loo yaqaan oggolaansho, si loola wadaago macluumaadka ku saabsan ilmahaaga Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA), Wakaaladda Medicaid ee Gobolka Oregon, si aad u heli karto magdhawga Medicaid ee adeegyada caafimaadka ee la caymiyey ee lagu bixiyey dugsiga. Degmo dugsiyeedyada iyo Degmooyinka Adeegga Waxbarashada waxa dhici karta inay ka helaan magdhaw bar ah OHA kaasi oo ah kharashka adeegyada caafimaadka ay caymisay Medicaid ee la siiyo carruurta qoran Medicaid ee naafada ah. Si aad u hesho magdhawga Medicaid, Dugsiyada Dadwaynaha Portland (PPS) iyo Degmada Adeegyada Waxbarashada Multnomah (MESD) waxay u baahan yihiin oggolaanshahaaga si ay OHA ula wadaagaan macluumaadka ku saabsan ilmahaaga. Nooca macluumaadka ee soo socda ee ku saabsan ilmahaaga ayaa loo baahan karaa in lala wadaago OHA: magaca; taariikhda dhalashada; noocyada adeegyada la siiyey, taariikhda(aha) adeegga la siiyey, iyo cidda siisay; diiwaanada xaadiritaanka, iyo Lambarka Aqoonsiga Ardayga Gobolka (SSID).

## Wargelinta Waalidka

PPS iyo MESD ma wadaagi karaan macluumaad ku saabsan ilmahaaga ruqsaddaada la'aanteed. Markaad ka fekerayso bixinta ruqsaddaada, fadlan ogow inaad leedahay xuquuqda soo socoto:

1. PPS iyo MESD kaagama baahan karaan inaad iska diiwaangeliso Qorshaha Caafimaadka Oregon (Medicaid) si uu ilmahaagu u helo adeegyada caafimaadka dugsiga ee ilmahaagu mutaystay.
2. PPS iyo MESD kuma waydiin karaan inaad bixiso kharashka adeegyada caafimaadka la xiriira ee ilmahaagu ku helo dugsiga. Tani waxay ka dhigan tahay in PPS aysan ku waydiin doonin caymiska lacagta yar (co-pay) ama kan lacagta badan (deductible) si ay ugu dallacaan OHA adeegyada la bixiyey.
3. Haddii aad siiso PPS iyo MESD ruqsadda ay kula wadaagayaan macluumaadka OHA si ay ugu dallacaan Medicaid:
    a. Tani saamayn mayso caymiska ilmahaagu heli karo intuu nool yahay ama faa'ido kale oo Medicaid; amase sinaba u xaddidi mayso isticmaalka qoyskaaga ee faa'idooyinka Medicaid ee dibadda dugsiga.
    b. Ruqsaddaadu sinaba u saamayn mayso adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga ama Barnaamijka Waxbarashada la Khaasyeelay (IEP) ama xuquuqda Qaybta 504, haddii ilmahaagu mutaystay inuu helo.
    c. Ruqsaddaadu u horseedi mayso wax isbeddel ah oo ku dhaca xuquuqda ilmahaaga ee Medicaid.
    d. Ruqsaddaadu horseedi mayso halista luminta mutaysiga barnaamijyada Mediciad ama OHA maalgaliso ee kale.
4. Haddaad bixiso ruqsadda, waxaad xaq u leedahay inaad isbeddesho oo aad ka laabato ruqsadda markii aad rabto. Waxa waajib ah inaad ***qoraal ahaan*** ugu sheego degmo dugsiyeedka in ruqsaddaadii aad ka laabatay.
5. Haddaad ka laabato ruqsaddaada ama diido inaad oggolaato degmo dugsiyeedku inay la wadaagto diiwaanada iyo macluumaadka ilmahaaga OHA iyadoo ujeedadu tahay raadinta magdhawga Medicaid ee kharashka adeegyada caafimaadka dugsiga ee la daboolay, PPS iyo

MESD waxay sii wadi doonaan inay masuul ka ahaadaan siinta ilmahaaga adeegyo caafimaad, oo adiga kuu bilaash ah.

## Oggolaanshaha Waalidka

Waan akhriyey oon fahmay ogaysiiska. Wixii su'aal aan qabay waa laga jawaabay. Waan fahamsanahay in Oggolaanshaygu ka caawin doono degmo dugsiyeedka inay raadsato magdhaw qayb ah ee kharashka adeegyada Mediciad caymiso ee la siiyo ilmahayga. Waxaan dooran **mid ka mid ah waxa soo socda** si aan u muujiyo Oggolaanshahayga:

☐ Waxaan ruqsad u siiyey Dugsiyada Dadwaynaha Portland iyo Degmada Adeegyada Waxbarashada Multnomah inay la wadaagaan OHA diiwaanada iyo macluumadka khuseeya ilmahayga iyo adeegyada caafimaadka Medicaid Caymisay, markay daruuri noqoto.

☐ Uma siinin ruqsad Dugsiyada Dadwaynaha Portland ama Degmada Adeegyada Waxbarashada Multnomah inay la wadaagaan OHA diiwaanada iyo macluumaadka khuseeya ilmahayga iyo adeegyada caafimaadka Medicaid caymiso, markay daruuri tahay.

☐ Ilmahaygu uma qalmo Qorshaha Caafimaadka Oregon (Medicaid).

| Magaca Ilmaha | Taariikhda Dhalashada | SSID |
|---|---|---|
| | | |

Magaca Waalidka/Masuulka: ____________________________________________

Saxeexa Waalidka/Masuulka: ______________________ Taariikhda: ________________

**Waalid/Masuul:** Fadlan ku soo celi Oggolaanshahaaga saxeexan oo taariikhaysan Xafiiska Soo Dhawaynta ee dugsiga ilmahaaga.

**Shaqaalaha Dugsiga:** Meel ku qor taariikhda waalidku saxeexay Oggolaanshaha iyo xaaladda halka ka hoosaysa tab-ka Medicaid ee bogga Ardayga ee Synergy SIS.